



Hormarka ilmaaga ee  
**Iskuulka barbaarinta**



SOLLENTUNA KOMMUN

[www.sollentuna.se](http://www.sollentuna.se)



## Nidaamka waxbarashada ee carruurtu wuxuu ka bilaabmaa iskuulka barbaarinta

Anaga oo diirada ku hayna ciyaarista, waxaan ku sahaminnaa luqadda, xisaabta, sayniska iyo qalabka dhijitaalka ah ee iskuulka barbaarinta. Iyagooyadaa wada xariiraya qaabab kala duwan sida sawirrada, qaababka, muusigga, heesaha, riwaayadaha iyo dhaqdhaqaqa, carruurtu waxay helayaan fursad ay ku sharraxaan hareerahooda. In kor loogu akhriyo carruurta ka dibna laga wada hadlo buugga waxay ka dhigan tahay inaan horumarinno ereyada iyo male-awaalka carruurta jawi ammaan iyo waxbarasho leh.

### Barashada iskuulka barbaarinta

Iskuulka barbaarinta waa inuu ahaadaa mid madadaalo leh, oo ammaan ah oo waxbarasho u leh carruurta oo dhan. Hal-kan waxaan ku bedelanaa xariirkha siyaabo kala duwan ciyaar, xisaab, saynis iyo qalab dijital ah.

Xiisaha iyo rabitaanka wax barashada ayaa aasaas u ah waxbarashadda halka ay ku dheehan tahay ciyaartu. Iskuulka barbaarinta, carruurtu waxay fursad u helaan inay wax dhisaan, qaabeeyaan oo wax ku abuuraan iyagoo kaashanaya qalab iyo farsamooyin kala duwan.

### Waxbarashada iskuulka xannaanada waa inay:

- Xoojiyan hal-abuurka ilmaha, xiisaha iyo isku-kalsoonaanta;
- Ka caawisa ilmaha inuu yeesho naxariis iyo daryeelida dadka kale;
- Bartaa carruurta muhiimadda ay leedahay horumarka waara;
- Saldhig u dhigtaa carruurta fahamka dimoqraadiyadda;
- Siisa carruurta faham dheeraad ah oo ku saabsan kala duwanaanta;
- Bartaa carruurta xuquuqda aadanaha.

## **Yoolalka iskuulka xannaanada ee Sollentuna:**

- *Tayo barbaarinta sare:* Iskuulka barbaarinta waa inuu aasaaska u dhigtaa nolol dheer oo waxbarasho. Halkan carruurtu waxay ku helaan waxbarasho maalin kasta, deegaan xooga saaraya daryeelka, horumarka iyo waxbarashada.
- *Amniga:* Dhammaan carruurtu waa inay dareemaan badbaado iskuulka xannaanada iyo barbaarinta.

## **Horumarinta luqadda si wada jir ah**

Iskuulka barbaarinta, ilmahaagu wuxuu la korayaan carruurtu kale iyo barbaariyayaal karti leh. Waaan sidoo kale la shaqeeyeynaa waalidiinta /mas'uulka. Iskuulka barbaarinta, waxaan siinaa ilmahaaga xaalado uu ku hadlo kuna fahmo iswiidhishka. Waalid ahaan, waad ku hadli kartaa oo u akhrin kartaa ilmahaaga buugaag ku qoran luqadda aad ku isticmaasho guriga. Si wada jir ah ayaan uga caawinnaa ilmahaaga inuu horumariyo afkooda!



## **Ma ogtahay?**

- Carruurta aadey iskuulka xannaanada waxay leeyihiin faa'iido aqooneed markay bilaabayaan iskuulka hoose.
- Carruurta aan af iswiidhishka ahayn afkooda hooyo waxaa la siiyaa fur-sad ay ku horumariyaan labada af ee iswidhishka iyo afkooda hooyoba.

## **Akhriiska kor waa qeyb dabicii ah a**

Iskuulka barbaarinta inta badan waxaan kor ugu aqrinnaa carruurta. Markii aan gadaal ka falanqeyno buugga aan aqrino, caruurtu waxay lahaan karaan waaya-aragnimo cusub. Carruurtu waxay ku ballaariyaan aragtidooda si wadajir ah asxaabtooda iyo barbaariyayaashooda.

Waxay horumariyaan male-awaalkooda, ku dhawaaqidooda iyo ereybixintooda. Tani waxay sidoo kale awood u siinaysaa carruurtu inay soo bandhigaan fikradooda iyo fikradahooda.

## **Marabtaa inaad waxbadan aqriso?**

Fadlan kaalay nagu soo booqo iskuulka xannaanada ee Sollentuna:  
[www.sollentuna.se/forskola--skola/Forsko-la/forskolor/](http://www.sollentuna.se/forskola--skola/Forsko-la/forskolor/)

Waxaad ka heli kartaa manhajka iskuulka xannaanada iyo barbaarinta bogga internetka ee Hay'adda Waxbarashada ee Iswidhan:  
[www.skolverket.se/undervisning/forsko-lan/laroplan-for-forskolan](http://www.skolverket.se/undervisning/forsko-lan/laroplan-for-forskolan)

## **Ku soo dhowow iskuulka xanaa-nada carruurta ee Sollentuna!**

Degmada Sollentuna, hadafkeenu waa inaan heysano is-kuulada ugu fiican Iswiidhan. Wadada na geynaysa halkaas waxaan ugu yeernaa Safarka Iskuulka. Safar bilaabaya xanaanada oo la socota waxbarashadii ugu horreysay ee carruurta. Iskuulka barbaarinta waa qayb aad u muhiim ah oo halxiraalaha ka mid ah waxbarashada carruurta iyo horumariyeaasha. Waxaan bilaabeynaa inaan la shaqeyno luuqada caruurga horeyba waxaan ugu jirnay iskuulka xannaanada iyo cunuggaaga oo la kobciya carruurta kale iyadoo ay hoos imaanayaan macalimiin karti leh. Iskuulka barbaarinta waa meal muhiim u ah carruurta oo dhan. Halkaas, carruurtu waa inay dareemaan inay haystaan meal aamin ah oo waxbarasho leh oo ay ku kori karaan kuna dareemaan wanaag.

Soley Aksöz Lithborn (M), gudoomiyaha guddiga waxbarashada, Linda Ekstrand, madaxa maamulka ee xafiiska waxbarashada

**SOLLENTUNA  
KOMMUN**

